LOCAL 503 SEIU Stronger Together

Ra'iyi ururinta Gorgortanka Shaqaalaha Daryeelka Guriga/Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed ee 2019-ka

Qaybta 2 — Wanaajinta Nidaamyada Mushaharka

Wada-xaajoodka loogu talagalay heshiiskeena ururka ee xiga wuxuu bilaabmayaa Maarso 2019-ka, iyada oo daryeel bixiyayaasha sida adiga oo kale ay la fariisan doonaan wakiilo ka socda Gobolka Oregon si ay gorgortan uga galaan heshiiskeena xiga. Waa in aanu ogaano isbeddelada aad jeclaan lahayd in aad aragto.

Waan ognahay in ay jiraan arrimo badan oo muhiim ah oo wax laga qabanayo, sidaa darteed waxaanu bilaabaynaa ra'yi ururin ka kooban saddex qaybood.

- Noofambar: Mushaharka, Faa'iidooyinka & Hawlgabnimada
- **Diisambar: Wanaajinta Nidaamyada Mushaharka**
- January: Tababarka, Diiwaangelinta & arrimaha kale ee muhiimka ah

Inkasta oo mushaharka uu mudnaanta muhiim ah u leeyahay shaqaalaha, waxaa sidaasi oo kale muhiim ugu ah in lacagta ay ku helaan wakhtigii loogu talagalay.
Inkasta oo aan guulo gaarnay heshiishkeenii u dambeeyay, sida in gobolka looga baahan yahay in ay kharash dheeraad ah bixiyaan marka lacagtu soo daahdo 'late fees'/lacag siyaado koontada lagala baxo 'overdraft' marka waqti dambe lacagta nala siiyo, waa in aanu sii wadnaa dagaalka loogu talagalay wax hagaajinta si loo xaqiijiyo in shaqaaluhu lacagta ay ku helaan wakhtigii loogu talagalay, mar kasta.

Weligaa lacag ma lagu siiyay goor dambe taasi oo ay sababtay qalad uu sameeyay Gobolku, xafiiska degaanku ama Waajibaadka Dhex-dhexaadinta Maaliyaddeed (FI)?

- ○ Haa
- ○ Maya

Haddii aad ku jawaabtay haa, maxaa sababay in lacagta lagu siiyo goor dambe (dooro dhamaan kuwa ku khuseeya)

- ○ Lacagta oo soo daahday ama si aan sax ah ahayn oo ay hawsheeda u qabteen shaqaalaha xafiisku
- ○ Qiimeynta macmiilka oo aanan lagu dhammeystirin waqtigii loogu talalay
- ○ Foojarka oo lumay ama soo daahay (daryeelka guriga kaliya)

Sidee ayay lacagta lagu siiyay goor dambe kuu saameysay?

Maxay ahayd waayo-aragnimadaada ah isku dayga in lacagta lagu siiyay goor dambe loo xalliyay?

Miyaad heshaa lacagtaada adiga oo isticmaalaya nidaamka lacag dhigashada tooska ah?

- ○ Haa
- ○ Maya

Haddii aad ku jawaabtay maya, maxayna sidaasi u ahayn?

- ○ Ma lihi koonto bangi
- ○ Waan leeyahay koonto bangi laakiin marnaba iskuma diiwaan gelin lacag dhigashada tooska ah
- ○ Kuwo kale (fadlan si gaar ah u tilmaan)

Ma maqashay Hubinta Booqashada Elektaroniga ah (EVV)

- ○ Haa
- ○ Maya

Sidee baad u aragtaa EVV?

- ○ Wax walwal ah kama qabo
- ○ Walwal ayaan ka qabaa
- ○ In aan walwal ka qabo ama in aanan walwal ka qabin midkoodna ma jiro
- ○ Si dhexdhexaad ah walwal uga qaba
- ○ Si aad ah walwal uga qaba
- ○ Ima khuseyso - Ma aan maqlin EVV

Waa maxay walwalkaaga u weyn ee ku saabsan EVV? (dooro dhamaan kuwa ku khuseeya)

- ○ Waxyaabaha u gaarka ah qofka 'privacy'
- ○ Waxaa adag in la isticmaalo
- ○ Carqalad ayay ku tahay aniga iyo macmiilkayga
- ○ Wax macno ah iima sameynayo aniga daryeel bixiyaha qoyska ahaan
- ○ Ima khuseyso - Ma aan maqlin EVV
- ○ Kuwo kale (fadlan si gaar ah u tilmaan) [ ]

Ma jiraan wax kale oo aad rabto in aanu ka ogaano shuruudaha looga baahan yahay EVV?

[ ]

Ma jiraan arrimo kale oo ku saabsan nidaamyada mushaharka oo aad jeclaan lahayn in aad la wadaagto Kooxdeena Gorgortanka SEIU ee la doortay?

[ ]

Loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW) kaliya

Kaliya buuxi qaybtan haddii aad tahay PSW. Waxaad tahay PSW haddii aad adeegyo siiso dadka qaba naafanimada. Haddii aadan ahayn PSW, fadlan u gudub qaybta xigta.

Intii lagu jiray wareegii u dambeeyay ee gortortanka waxaanu tixgelin siinay ka wareegida muddada lacag bixinta oo ah bisha 1deeda-15keeda/16keeda-toddobaadka dhammaadkiisa iyada oo loo wareegayo muddada lacag bixinta oo 14 maalmood ah. Waxaanu ku dambeynay in aanu sii wadno habka bixinta lacagta ee hadda jira ka dib markii la baaray PSW taasi oo ku saabsan waxa ay doorteen. Laakiin waxaanu sii wadnaa in aanu maqalno in dadku rabaan maalmaha lacagta la bixinayo oo aan isbedbedelin sidaa darteed waxaanu u rabnaa in aanu dib u eegno anaga oo dhageysanayna PSW taasi oo ku saabsan arrintan.

Waan ognahay in wax kasta oo beddelaya sida lacagta aan u bixino in kaliya ay tahay in la sameeyo ka dib marka tixgelin taxadar ku jiro la sameeyo—iyada oo isbeddeladii la soo dhaafay, sida isbeddelka lagu sameeyay PPL, ay walwal badan u lahaayeen kuwo badan oo inaga mid ah. Anaga oo soo yareynayna arrimaha ka haray miiska gorgortanka, waxaan doonaynaa in aan hal mar oo dheeraad ah helno jawaab celin ku saabsan isbeddelada la soo jeediyay isla markaana si cad u helno dareen ah haddii ay PSW daneynayaan ama aanay daneynaynin isbeddelkan.

Fadlan hoosta ka akhri wanaaga iyo xumaanta uu leeyahay mid kasta oo ka mid ah habka bixinta lacagta ka dibna lana socodsii waxa aad u maleynayso:

Habka bixinta lacagta ee hadda jira ee ah bisha 1deeda-15keeda/16keeda-toddobaadka dhammaadkiisa:

Wanaaga uu leeyahay:

- Muddada lacag bixinta ee labada ah oo isku noqoysa bil oo buuxda, taasi oo saacadaha bishii loo qoondeeyay Macmiilka ka dhigaysa kuwo sahlan.
- Iyada oo aanu jirayn isbeddel kale oo nidaamka ku imaanaya
- Shaqaalaha oo wadan kara in ay biilka diraan hal mar bishii marka la eego laba jeer bishiiba haddii ay doortaan

Xumaanta uu leeyahay:

- Iyada oo la sii wado jadwalka mushaharka ee hadda jira, halkaasi oo taariikhda jeegaga la jaro ay kala duwan tahay marka bil ilaa bil loo eego iyada oo uu saameyn ku yeesho toddobaadyada dhammaadkiisa. Tusaale, haddii muddada lacag bixintu ay ku dhammaato Khamiista, xaashida saacadaha shaqada waqtiga ay ku eg yihiin lama joogo ilaa laga gaarayo xiritaanka ganacsi ee Talaadada xigta. Wixii intaasi ka dambeeya, Gobolku wuxuu u baahan ahay sideed maalmo shaqo si ay hawsha u qabtaan (iyada oo sababtu tahay qabashada hawsha ee xafiiska degaanka, oggolaanshaha ODDS iyo qabashada hawsha PPL). Jeegaga oo aan la jarin ilaa laga gaarayo 15 maalmo shaqo ka dib marka muddada lacag bixintu dhammaato.
- Jahwareerka ka jira waqtiga dheeraad ah ee la shaqeeyo oo sii socon doona iyada oo toddobaadka shaqo (Axada-Sabtida) aanu la mid noqon dooni muddada lacag bixinta.

Loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW) kaliya (ayaa wali lagu jiraa)

U wareegida habka bixinta lacagta oo ah 14 maalmood/2 toddobaad

Wanaaga uu leeyahay:

- Isaga oo saamaxaya in la yeesho jadwal aan isbedbedelin oo loogu talagalay marka jeegaga la jaro. Tusaale muddada lacag bixinta waxay had iyo jeer dhammaan doontaa Sabtida. Xaashida shaqada oo waqtigeedu ku ekaan doono marka la gaaro xiritaanka ganacsi ee Arbacada waxaanan culeys saari doonaa in aanay isbedbedelin taariikhda qabashada hawsha lacag bixinta ee toddobaad-dhaafka ah. Marka ay noqoto shaqaalaha u qalmaya waqti dheeraad ah oo ay shaqeeyaan, waxay toddobaadkaaga shaqo kala mid dhigaysaa muddadaada lacag bixinta. Tani waxay dedejin kartaa sida dhakhsaha ee shaqaalahu ay u helayaan lacagtooda waqtiga dheeraadka ah ee ay shaqeeyaan iyada oo u sahlaysa in ay fahmaan ka uu yahay toddobaadka waqtiga dheeraadka ah la shaqeeyo ee aad helayso. Waqtigan la joogo, marka ay muddada lacag bixintu ku dhammaato toddobaadka bartankiisa, waxay noqon kartaa mid jahawareer leh sababta oo ah shaqaaluhu ma helayaan waqtigooda dheeraadka ah ee ay shaqeeyaan qaybta hore ee toddobaadkaasi ilaa laga gaarayo bil ka dib. Shaqaaluhu waxay dooran karaan in ay biilka diraan afartii toddobaadba mar, halkii ay labadii toddobaadba mar ka sameyn lahaayeen haddii ay rabaan.

Xumaanta uu leeyahay:

- Saacadaha macaamiisha oo la qoondeeyo bil kasta. Iyada oo noqon karta mid jahawareer u leh shaqaalaha iyo Macaamiisha labadooduba in ay yeeshaan saacadaha macaamiisha oo la qoondeeyo bil kasta, laakiin habka bixinta lacagtu ay soconaysa 14 maalmood oo kasta.
- Iyada oo shaqaalaha iyo Macaamiisha looga baahan yahay in ay maraan isbeddel kale oo nidaamka ku imaanaya, kaasi oo noqon kara mid walwal keena.

Isaga oo ku saleysan wanaaga iyo xumaanta ay leeyihiin ee kor ku qoran, habkee bixinta lacagta ah ayaad doorbidaysaa?

- ○ In la sii wado habka bixinta lacagta ee hadda jira ee ah bisha 1deeda-15keeda iyo 16keeda-bisha dhammaadkeeda
- ○ In loo wareego habka bixinta lacagta oo ah 14 maalmood/2 toddobaad
- ○ Ma hubo / labada kala doorashaba waa caadi

▼ DHAMMAAN SHAQAALAHA DARYEELKA GURIGA **IYO** SHAQAALAHA TAAGEERADA SHAKHSIYEED: FADLAN U GUDUB QAYBTAN ▼

Daryeelka Guriga ee Gaarka ah

Bixiyayaasha Daryeelka Guriga ee Gaarka ah waxay qabtaan shaqo la mid ah ta Daryeel Bixiyayaasha Macmiilku-Shaqaaleeyo, balse waxaa la siiyaa lacag yar mana laha wax xuquuq la ilaalinayo oo ay ugu biiraan urur shaqaale. Lahaanshaha kooxo badan oo daryeel bixiyayaal ah oo qabanaya shaqo la mid ah ta aan qabano iyaga oo mushahar hoose ku shaqeynaya waxay hoos u dhigaysaa awoodeena dhanka gorgortanka — Gobolku wuxuu tilmaamaa heerarka tayo ee hay'adaha gaarka loo leeyahay marka aan ka wada xaajoodka ka gelno heshiiskeena. Tallaabada u horreysa ee abaabulka olole waa qorshe u dejinta xiriiradada aan la leenahay ganacsiga daryeelka.

Adiga ama qof aad garanayso miyuu u shaqeeyaa Daryeelka Guriga ee Gaarka ah ama hay'ad Caafimaadka Guriga ah?

○ Haa ○ Maya

Adiga ama qof aad garanayso miyuu adeegyo ka helaa Daryeelka Guriga ee Gaarka ah ama hay'ad Caafimaadka Guriga ah?

○ Haa ○ Maya

Macluumaadka meesha la iskala soo xiriirayo

MAGACA HORE _____ MAGACA DAMBE _____

CINWAANKA JIDKA _____ MAGAALADA _____ GOBOLKA _____ ZIP-KA _____

TELEFOONKA GACANTA* _____

EMAIL-KA _____

*Bixinta aan bixinayo lambarkayga telefoonka, waxaan fahamsanahay in Urrurka Adeega Shaqaalaha Caalamiga ah (SEIU), ururadiisa degaanka, iyo dadka xiriirka la leh ay isticmaali karaan tiknoolajiyada wicitaanta telefoonka ee tooska ah iyo/ama in ay xilliyo go'an farriimaha dhanka telefoonka iigu soo diri karaan telefoonkayga gacanta. SEIU marnaba wax lacag ah kama qaadi doonto farriimaha digniinta ah ee dhanka telefoonka. Farriimaha shirkadda telefoonka ama qiimaha xogta la isticmaalo ayaa laga yaabaa in ay khuseeyaan digniinahan la soo dirayo. Ku soo jawaab STOP si aad u joojiso helitaanka farriimaha; ku soo jawaab HELP wixii macluumaad dheeraad ah.

Macluumaadka Aan waajibka ahayn ee Qaaab-dhismeedka

SEIU Degaanka 503 waxaa ka go'an in ay sharfaan kala duwanaanshaha xubnaha oo dhan. Macluumaadka aan waajibka ahayn ee qaaab-dhismeedku wuxuu inaga caawiyaa fahamka aqoonsiga bulsho ee xubinimadeena.

Jinsi

○ Dheddig ○ Lab ○ Aan jinsiyad gaar ah lahayn ○ Kuwo kale

Magac u yaalada la doorbidayo

○ Iyada/Keeda/Waxeeda ○ Isaga/Kiisa/Wixiisa ○ Iyaga/Kooda/Waxooda ○ Kuwo kale (fadlan si gaar ah u tilmaan) _____

Midkee ka mid ah kuwa soo socda ayaa si dhow u matalaya jinsiyadaada/qowmiyaddaada (dooro dhamaan kuwa ku khuseeya):

☐ Madow ama Maraykanka Madow ah
☐ Aasiya ka soo jeeda ama Aasiyaanka Maraykanka ah
☐ Carabta Maraykanka ah, Ka soo jeeda Bariga Dhexe, Ka soo jeeda Waqooyiga Afrika
☐ Hisbaanik ama Latinx
☐ Hindida Dhaladka Maraykanka ama Dadka dhulka loogu yimid
☐ U dhashay Hawaii ama Jasiiraddaha Baasifiga ee Kale
☐ Caddaan ah
☐ Kuwo kale (fadlan si gaar ah u tilmaan)

Luqadda la doorbidayo

○ Ingiriisi	○ ASL (Luqadda Calaamadaha)	○ Cantonese
○ Mandarin	○ Russian	○ Isbaanish
○ Vietnamese	○ Amharic	○ Haitian Creole
○ Hmong	○ Korean	○ Nepali
○ Romanian	○ Soomaali	○ Tagalog
○ Tigrinya	○ Toishanese	○ Kuwo kale (fadlan si gaar ah u tilmaan)

Qofka keenay/Magaca Ururka: _____ Taariikhda: _____